

# Ma ka fakaraysaa dabaasha maanta?

Ku dabaalashada biyaha dabiiciga ah ayaa noqon karta wax firfircooni iyo farxad leh, gaar ahaana xeebaha la ilaaliyo ee Ottawa. Hase yeeshee, biyaha furan ayaa leh khataro u baahan inaad ka fiirsato, sida bakteeriyada xayawaanka duurjoogto, xaaladaha cimilada, iyo khataraha qarsoon. Waa muhiim in laga warqabo khatarahaan si loo xaqiijiyo wakhti badqab leh oo lagu raaxaysan karo.

## Baro khataraha kahor inta aadan dabaalan

- **Cimilada aadka u daran:** Wiriqda, dabaysha xoogga badan, iyo roobka culus ayaa noqon kara mid khatar ah.
- **Roobka culus:** Roobka ayaa kusoo xaardhi kara waxyaabaha sunta ah biyaha, taas oo ka dhigaysa mid suuragal ah heerarka sarreeya ee bakteeriyada.
- **Xaaladaha Xeebta:** Shinbiro badan, kaluun mayd ah, algae, ama qashin ayaa biyaha soo geli kara taas oo suurtagelinaysa kordhka heerarka bakteeriyada.
- **Biyaha isxiray:** Dabaysha aadka u sarraysa iyo mawjadaha biyaha walaaqi kara, kuwaas oo qarinaaya oo qasaaya bakteeriyada.
- **Nabarada ama dhaawacyada furan:** Bakteeriyada ayaa geli karta meelaha nabarada ama dhaawacyada.

## Ilaali caafimaadkaaga inta lagu jiro iyo kadib dabaasha

- **Kahor dabaasha:** Gee ilmaha musqusha si loo yareeyo sumoobida.
- **Inta lagu jiro dabaashada:** Ku hay madaxaaga dusha sare ee biyaha oo iska ilaali liqidda biyaha.
- **Kadib dabaasha:** Ku faraxalo saabuun ama adeegso daawada gacmaha nadiifisa, qubayso, oo qalaji dhagahaaga.

## La socoshada biyaha xeebta

### Muxuu yahay?

Caafimaadka Dadweynaha Ottawa "Ottawa Public Health (OPH)" ayaa la socota tayada biyaha ayadoo biyaha ka qaada sanballo xeebaha la ilaaliyo inta lagu jiro biyaha xagaaga.

Sanballada ayaa lagu baaraa Shaybaarka Caafimaadka Dadweynaha ee Gobalka si looga baaro bakteeriyada *E. coli*. Heerarka sarreeya ee *E. coli* oo ka badan 200/calaa 100ml ayaa muujin kara jiritaanka maadooyinka kale ee khatarta ah, kuwaas oo kordhin kara khatarta ku xanuusashada biyaha.

### Isbeddelka baaritaanka maalinlaha ahaa ilaa toddobaadle

Laga bilaabo 2025, PPH ayaa uruurin doonta sanballada biyaha toddobaad kasta beddelkii ay samayn lahayd maalin kasta. Isbeddelkaan ayaa waafaqsan talaabada ay qaadeen inta badan waaxaha caafimaadka Dadwaynaha ee Ontario iyo Guddiga Qaran ee Caasimada.

### Maxaa isbeddelka keenay?

Natiijooyinka sanballada maalinlaha ah ayaa qaata 18 ilaa 24 saac in laga shaqeeyo, mana sheegayaan xaaladaha markaas jira. Lyadoo diiradda la saaraayo xaaladaha markaas jira (cimilada, biyaha cirka), waxaad samayn kartaa go'aanka faahfaahsan ee la xiriira dabaasha.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan ilaalinta badqabka xeebaha Ottawa booqo: OttawaPublicHealth.ca/Beaches ama iskaanka mari koodhka QR.